

Macmiil adeeg ama macmiil buuxa



Markii lagu oggolaado xuquuqda kalkaalinta shakhsiyeed waxaa suurogal kuu ah dhawr siyood oo loo xalliyo aarintaada. Shirkadda DHAWAANSHO waxaad ka kala dooran kartaa in aad noqoto **macmiil adeeg** ama **macmiil buuxa**.

Markii **macmiil adeeg** aad tahay waxaad dooranaysaa in aad adigu shaqaalaysiisato kalkaaliyeyaashaada anagan aad naga iibsato adeega aad u baahan tahay.

Markii **macmiil buuxa** aad tahay anaga ayaad noo xil saaraysaa hawsha xagga qabashadeeda iyo maamulkeedaba ee arrimahaaga kalkaalinta shakhsiyeedkaaga.

Wadajir ayaan waxaan u helaynaa xal iyo shaqo qaybin aad maqsuud ku tahay. Hal mid ayaa hubaal ah –xalkasta dooro haaddana adigu markasta qayb ayaad ka tahay saamays weyna waad ku leedahay.

Macmiil adeeg waa fududaysanayaa!

Haddaba haddii aad rabtid adiga ayaa shaqaalaysanaya kalkaaliyeyaashaada.

Xilkaasi wuxuu noqon karaa mid xiiso leh horumarna kuu soo jiidida kara. Laakiin waa in diyaar loo ahaadaa in shaqaalayntu ay tahay hawl baaxad weyn, masuuliyad weyn wadata ayna u baahan tahay waqti iyo aqoon.

Anagu waxaan diyaar kuula nahay in aan bilowga ku caawino, talooyin iyo taageerana aan ku siino markii loo baahdo.

Markii aad tahay macmiil adeeg waxaad u deynaysaa shirkadda DHAWAANSHO in ay qabato hawsha joogtaada ah ee mushaarada, canshuuraha iyo xisaab haynta. Intaas wixii ka dheeraad ah waxaad markasta noo xilsaari kartaa adeegyo kale sida:

- In aan kaa caawino raadinta kalkaaliyeyaasha, interfiyuu ka qaadidda dadka shaqada soo doonta iyo qorintaaka heshiiska shaqaalaynta.
- Wax barid sida xagga su'aalaha quseeya bay'ada shaqada iyo su'aalaha quseeya shaqobixiyenimada ama waxbarid khaas ah oo adigu aad rabitaankeeda la timaaddo.

"la shaqayta DHAWAANSHO ayaa waxay ainga iyo qoyskaygaba aad noogu fududaysay nolol maalmeedkeeni"

Ante xilsaarte DHAWAANSHO ilaa iyo 1997, Qaadayna talaabada ah inuu asugu shaqaaleeyo naqdo 2004.



- Garabsiin haddii uu qilaaf yimaado xogga kalkaalinta ah., la xiriirid degmada ama caymiska bulshada guud iyo wixii la mida.

Markasta waxaan heegan u nahay in aan talo iyo taageero kugu siino taleefanka si aad kalsooni ugu dareento kaalintaada shaqobixiyenimo.

Nooca iyo baaxadda adeegga iyo shaqada lagu qabanayo mar rkasta adigaa dooranaya.

Macmiil buuxa – qayb ayaad ka tahay!

Haddii aad u aragtid in masuuliyadda shaqobixiyenimadu ay u baahan tahay waqti badan, kugu adag tahay ama aysan shaqaynayn sababtu waxay doonto ha noqotee waxaad masuuliyadda shaqobixiyenimada ku wareejin kartaa shirkadda DHAWAANSHO.

Taas waxaan ugu yeernaa **Macmiil Buuxa** ayaad noo tahay.

Macmiil buuxa macnaheedu waxaa weeye anga ayaad noo daynaysaa qayb badan oo ka mid ah hawsha qusaysa kalkaalintaada iyo kalkaaliyeyaashaada.

Anaga ayaa shaqaalaynayna kalkaaliyeyaashaada, waxbarayna, hagayna masuulna anagaa ka ah mushaaraha iyo canshuurta, dejinta jadwalka shaqada iyo wixii kale oo loo baahan yahayba, anaga ayaa kaalintaada istaagayna haddii iloo baahdo markii qilaaf ama borabaleem kale yimaado oo la xiriira kalkaalintaada.



NÄRA

Kooxda hareere joogta qofka xaqqa u leh kalkaalinta waxaa mid ka mid ah kalkaaliyeyaashu u xilsaaran yahay in uu asaga oo la kaashanaya xilsaartaha uu qorsheeyo oo hoggaamiyo shaqada joogtada ah oo maalin walba la qabto.

Taas anagu waxaan ka dhamays tiraynaa waxbarid joogto ah iyo in aan ka faa'adaysano qibradaha na soo mara oo dhan si aan u horumarino oo u sii hagaajino shaqadeena.

Adiga ayaa goosanaya kalkaaliyeyaasha aad xilsaaranaysid iyo weliba qaabka ay yeelanayso hawshu iyo sida loo qabanaayo. Anaga kaalinteenu waxa weeye in aan siyaalo kala duwan iyo sida aad adigu jeceshahay iyo karaankaaga aan kuu sahalno oo kuu wanaajinno nolol maalmeedkaaga.

Waa kuu furan tahay in aad is beddesho!

Marna kuma xayirnaanaysid kala doorshada in aad noqotid macmiil adeeg ama macmiil buuxa !

Dabcan markii aad rabto wax waad ka toosin kartaa wixii rabitaankaagu ahaa, haddii aad dareento in ay jiraan wax aan shaqaynayn, ama haddii ay xaaladdaada wax iska beddelaan ama sababo kale jiraan.

Markasta waxaan rabnaa in aan wada hadal furan kula lahaano. Anaga midda noogu muhiimsani waxa weeye in aan habab kala duwan kaaga caawini karno kuu fududaynta nolol maalmeedkaagga.



”Subax wanaagsan madaxdow”

NÄRA